

Faduusha



<https://www.flickr.com/photos/usdagov/13434141274>

Maxaad ka qaban kartaa faduusha ?

faduushu ama daan-daansigu waa ficil si joogta ah qof loogu sameeyo ama loogu hanjabo taas oo qofka ku sababta cabsi , isla hadal, fikir ama qofka oo wax yeelaysa maskax ahaan.

In qof si joogto ah loogu waco magac xun ama oraah waxay noqon kartaa faduul/maadsi/daan-daansi qofkas lagu maadaystay ama lagu daan-daansaday , caruurta waxa ay sabab ugu noqon kartaa in ay la dersaan dhibaato maskaxeed.

In caruurta loogu waco magac xun ma waxay noqon kartaa faduul?

Haa, hadii qof loogu Waco magac xun waxay noqon kartaa faduul. Haddii lagu celceliyo waxay sababi kartaa cabsi ama dhaawici kartaa ciyaalka.

Faduushu qof kasta ma saamayn kartaa?

Dabcan ! faduushu waxay ku salaysan tahay farqiga u dhaxeeya dadka sida jinsiyadda, diinta, cuuryaanimada, xaalada qaxootinimada, wadanka aa u dhalatay, xaalada jinsiga la xiriira – nin mase dumar, muuqaal kaaga sida uu yahay iyo kuwo kale sidaa darteed faduushu ma waxyeeleeyso caruurta oo kaliya laakiin si

guud ayey saamayn ugu leeydahay bulshooyinka iyo dadka marqaati u ahaa ama waayo aragtinimada u leh.

Hadii cunug la faduuliyo dadka qaan gaar ka ahi maxay samayn karaan?

Dad ka qaan gaarka ah waxaa jira tilaabooyin badan oo ay qaadi karaan hadey la kulmaan caruur lagu faduulshay sida caawinta caruurta la faduulshay.

- Sabab too ah faduushu waxay dhacdaa marka dad ka qaan gaarka ahi uusan meesha joogin, waa muhiim in aad cunuga lahadashid xiliga dhacdada.
 - La hadlid canuga waxa uu yahay faduushu iyo haddey jiraan caruur kale oo ku maadsada.
 - Marka aad lahad laysid canuga qoraal ka samee wax walba oo canugu kuu sheego sida haddey jiraan dhacdooyin kale oo soo qabsaday sidoo kale isku day in aad ogaato hadduu canugu garanayo magacyada caruurta ku maadsata.
 - Ku dhiiri gali canuga in uu dadka qaan gaarka ah u sheego waxa kasta oo faduul ah ama maadsi la xariira oo iskuukiisa ka dhaca.
 - Arinta canuga kala hadal macalinkiiisa iyo shaqaalaha iskuulka?
 - U soojeedi ama usheeg in la sameeyo tababar kusaabsan ka hortaga faduusha .
 - Ku dhiiri gali caruurta in ay lasaaxiibaan kuwa la faduulshay hadii ay yaqaanaan iyo hadii kalaba. ku dhiira gali ayagana inay la saaxiibaan caruurta kale intii ay eedeen lahaayeen.
- ### Caruurta maxay ka qaban karaan faduusha?
- Waxey garab istaagi karaan caruurta kale ee la faduulshay waxayna siin karaan taageero saaxiibtinimo ama isku fasal ahaan.

- Caruurto waxay la hadli karaan qof qaan gaar ah oo ay ku kalsoonaan karaan una sheegi karaan in la faduuliyey.
- Waxay noqon karaan saaxiibo si faduushu meesha uga baxdo.
- Caruurto waxay saaxiib ku noqon karaan si shaqsi iyo sidoo kalana waxay ku saaxiibi karaan qadka internetka.

Markaan la hadlo Maamulada iskuulka maxay ka qaban karaan faduusha?

In lala hadlo maamulayaasha iyo macalimiinta iskuulka waa muhiim.

- Keen qoraal faah faahsan oo cadaynaya in canugaaga lagu faduuliyey iskuulka.
- Waxaad la kulmi kartaa macalimiinta iskuulka adoo weydiinaya canugaaga xaaladihiisa sida uu caruurta uula socdo haddii ay jiraa dabeecado gedisan oo ay ku arkeen iyo kasoo kabsashadiisa dhacdada ku dhacday.
- Haddii aad wal wal ka qabto in ay canugaaga saamayn maskaxeed ku reebtay faduusha caruurta kale waxaad la kulmi kartaa la taliye dhanka maskaxda ah ama dhaqtarka qoyskaaga.
- Haddii aad ogaato in kulankaaggii macalimiinta iskuulku uusan saamayn yeelan ama wax is bedel ah keenin waa inaad la kulantaa maamulaha iskuulka.
- Mar walba qoraal kasamee kulamada aad macalimiinta iyo maamulka iskuulka la yeelatid meelna ku xafid.

Maxaad ka filan kartaa

maamulayaasha iskuulku in ay sameeyaan si ay u xaliyaan dhibaata faduusha?

- iskuulku waa in uu si deg deg wax uga qabtaa dhibaatooyinka faduusha
- Masuuliyiinta iskuulku ma qaban karaan kulan dhex mara ardayda la faduuliyey iyo kuwa wax faduuliyey si ay u dhex dhexaadiyaan.

- Waa in ay dhinac walba si gooniya ula kulmaan oo kuwa wax faduuliyey u sheegaan in aan la aqbali Karin faduul dambe kuwa la faduuliyeyna nabadgalyadooda la sugaa loona sheegaa in aysan saamayn ku yeelan faduushu.

Warbixanada meelaha laga soo qoray

- Cartoon network : jooji faduusha kana hadal

<http://www.cartoonnetwork.com/stop-bullying/>

- MTV's Olalaha "A MTV Thin line"
- <http://www.athinline.org/>
- jooji faduusha dawlada maraykanka Stopbullying.gov
- kahortaga faduusha –Nebraska – waaxda wax barashada

<https://www.education.ne.gov/safety/bullying-prevention/>

- karhortaga uruur ka faduusha a iyo dambiyada internetka
- <https://www.adl.org/what-we-do>
- Nebraska Appleseed neappleseed.org

Sources

1. "What Bullying Is and Is Not." Anti-Defamation League Plains States Region . <https://www.adl.org/education/resources/tools-andstrategies/table-talk/what-bullying-is-and-is-not>. Omaha, NE. Print.
2. "Be an Ally. Take Action. Stop Bullying." Anti-Defamation League. <https://www.adl.org/sites/default/files/documents/assets/pdf/education-outreach/Be-an-Ally-Six-Waysonline-version.pdf>. New York, NY. Print.
3. "Bullying: How to Talk With Educators at Your Child's School." <https://www.education.com/reference/article/talk-educators-about-bullying/>. Stop Bullying Now! 2009.